

## Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiin Karo Ee Xilliga Barafka

### **Waa maxay sababta Minneapolis loogu soo rogo xaaladda gurmadka ee barafka?**

Inta lagu jiro qaboobaha, shaqaalahu waxa ay u soo baxaan xaaqidda barafka, iyada wadooyinka ku shuba cusbo ama barafka guraya. Waxaa lagu dhawaaqaa Gurmadda Degdegga Ah ee xaaqidda Barafka marka uu baraf badan da'o. Shaqaaluhu waxa ay barafka ka xaaqaan 1,400 mayl ee wadooyinka magaalada iyo dariiqyada Minneapolis muddo sadex cisho ah.

Sida kaliya oo wadooyinka barafka looga xaaqi karo waa in wadooyinka laga qaado gawaarida oo dhan. Taas waxa ay ku hirgaleysaa Sharciyadda Xaaladda Degdegga Ah. Marka magaaldu ku dhawaaqdo Xaaladda Degdegga ah, waxaa dhaqan galaya xayiraad lagu soo rogo goobaha gaadiidka la dhigan karo sadex maalmood ee xiga marka lagu dhawaaqo.

Mid kasta oo ka mid ah xaaladda Degdegga ah ee Barafka waxa uu leeyahay sharciyo u gaar ah. Xayiraadda lagu soo rogo goobaha gaadiidka la dhigto waxa ay shaqaalaha u ogolaaneysaa in ay barafka ka xaaqaan wadooyinka si gawaarida, bushkuleetiyada iyo dadka lugeynaya wadooyinku ugu socon karaan.

### **Waa maxay sharciyada gawaarida gaadiidka la dhigto sadexda maalmood ee xaaladda degdegga ah ee barafka?**

Inta badan waxaa xaaladda degdegga ah lagu dhawaaqaa ka hor 6da galabnimo si qof kasta loo siiyo fursad uu gaarigiisa ku dhaqaajayo.

**Maalinta 1**, habeenka u horeeya xaaladda degdegga ag ee barafka, shaqaalaha Magaaladu waxa ay xaaqaan wadooyinka leh calaamadda **Xaaladda Degdegga ah ee Barafka (Snow Emergency Routes)**. Khadkan waxaa ku dhagan calaamadda xaaladda degdegga ah ee barafka, magaca wadada waa mid ku qoran farta buluugga ah. Maalinta 1, gawaarida lama dhigan karo labada dhinac ee wadooyinkaas. Maalinta 1 waxa ay ku egtayah 9ka fiidnimo ilaa 8da aroornimo ee subaxa xiga.

**Maalinta 2** ee Xaaladda Degdegga ah ee Barafka, shaqaalaha Magaaladu waxa ay barafka ka xaaqaan wadooyinka cinwaanka **lambarada dhabanka ah** ku dhamaada iyo wadooyinka dhexda ku leh waddo kala qeybisa, sidaa darteed gawaarida lama dhigan karo wadooyinka cinwaankoodu ku dhamaado tirada dhabanka ah iyo waddo dhexda ku leh waddo kala qeybisa maalinta 2. Calaamadaha wadooyinkan waa kuwo cagaar ama midabka qaxwaha (brown). Dhinaca lambarada dhabanka ah waa wadooyinku cinwaankoodu ku dhamaado 2, 4, 6, 8, ama 0. Maalinta 2 waxa Xaaladda Degdegga ah lagu dhawaaqaa oo ka 8da aroornimo ilaa 8 fiidnimo.

**Maalinta 3** ee Xaaladda Degdegga ah ee Barafka, shaqaalahaa Magaaladu waxa ay barafka ka xaaqaan wadooyinka cinwaanka **lambarada kinsiga** ku dhamaada, sidaa darteed gawaarida lama dhigan karo wadooyinka cinwaankoodu ku dhamaado tirada knisinga ah maalinta 3. Calaamadaha wadooyinkan waa kuwo cagaar ama midabka qaxwaha (brown). Dhinaca lambarada kinsiga ah waa wadooyinku cinwaankoodu ku dhamaado 1, 3, 5, 7, ama 9. Maalinta 3 sharciyada goobaha gaadiidka la dhigto waxa ay bilaabanayaan 8da aroornimo ilaa 8da fiidnimo.

### **Maxaa dhacaya marka looga tago goobaha la xaaqayo ee xaaladda degdegga ah?**

Waa muhim in wadooyinka ay gaadiidku mari karaan, gaar ahaan ambalaasta, dab damiska, iyo gaadiidka gurmadka si ay u gaaraan guryaha iyo goobaha ganacsiga ee ay u socdaan. Waddada si fiican looma xaaqi karo xaaladda degdegga ah haddii ay gawaari yaalaan wadada. Baabuurta wadada looga tago Xaaladda Gurmadka Degdegga ah waxaa la saarayaa tigid waxaana la geynayaa goobta gaadiidka la dhigo ee Minneapolis.

### **Maxaa yeelayaa haddii gaarigeyga la jiido?**

Haddii gaarigaaga la jiido ka dib marka aad jabiso sharciyada xaaladda degdegga ah, waxaa la geynayaa goobaha gaadiidka la dhigto ee Minneapolis taasoo ku taala Van White Memorial Blvd. Goobaha gaadiidka la dhigo waxa ay furan yihin 24 saac xilliga xaaladda degdegga ah ee barafka.

Haddii gaariga lagaa jiido, waxa aad mas'uul ka tahay tigidka lagu siiyey iyo lacagta jiidista gaariga. Lacagta goobta la dhigo ayaa lagaa qaadayaa haddii goobta lagu hayo wax ka badan hal maalin. Goobta lacagta waxa aad ku bixin kartaa lacag caddaan ah, jeegga bangiga, VISA, MasterCard, iyo American Express.

Waxa aad soo wici kartaa **311**, ama **612-673-3000** haddii aad ka soo waceysa meel ka baxsan Minneapolis, si aad u ogaato in gaariga uu yaalo goobta gawaarida la geeyo ee Minneapolis iyada oo laga yaabo in lagaa qaado lacag keydka ee dheeraadka ah. Waxa kale oo aad ka ogaaneysaa aqoonsiyada lagaaga baahan yahay (sida mulkiyadda, aqoonsi sawir leh, iwm) si aad gaarigaaga u qaadato. Waxa kale oo aad ka baaran kartaa barta internetka si aad ogaato in gaarigaaga la geeyay goobta:  
<https://www.minneapolismn.gov/getting-around/parking-driving/impound-lot/vehicle-search/>

### **Waa maxay sababta aan tigid loo siin ama aan loo jiidin gawaarida jabiya sharciga?**

Shaqaalahaa iyo gaadiidka wax jiida darteed, suurogal ma aha in dhamaan gawaarida sharciga jabiya oo dhan tigid la saaro inta lagu jiro Xaaladda Degdegga ah ee Barafka. Deganayaasha magaaladu waxa ay wici karaan 311 ama soo boqo bogga internetka si aad u soo sheegto qof sharciga jabiyeey.

### **Sidee ayaan ku ogaanayaa in magaaladu ku dhawaaqday xaaladda degdegga ah ee barafka?**

- **Khadka Xaaladda Degdegga ah:** Marka aad soo wacdo khadka 612-348-SNOW, waxa aad ka ogaan kartaa in lagu dhawaaqay xaaladda degdeggaah ee barafka. Haddii lagu dhawaaqay xalladda degdegga ah ee barafka, khadka ayaa ka ogaaneysaa marka ay bilaabaneyso xayiraadda lagu soo rogay goobaha gaadiidka la dhigto.

- 311: Wuxuu aad soo wici kartaa 311 si aad u ogaato haddii magaaladu ku dhawaaqday xaaladda degdegga ah.
- Bogga Internetka Ee Magaalada: Bogga internetka ee Magaalada, minneapolismn.gov ayaaad ka ogaan kartaa in lagu dhawaaqay Xaaladda Degdegga ah ee barafka. Wuxuu kale oo aad dhaafi kartaa telefoonkaaga si laguu soo waco, laguugu soo diro fariin qoraal ah, ama iimeyl marka ay magaaladu ku dhawaaqdo Xaaladda Degegga ah ee Barafka.
- Baraha bulshada: Wuxuu aad kala socon kartaa bogga Facebook ama Twitter ee magaalada marka lagu dhawaaqo Xaaladda Degdegga ah ee barafka iyo sharciyada goobaha la dhigto ee dhaqangalka ah.
- Barnamijka Telefoonka: Dadka heysta nidaamka Android ama iPhone wuxuu ay la soo dagi karaan barnamijka Xaaladda Degdegga ah ee Minneapolis. Xilliga Xaaladda Degdegga ah ee Barafka, barnamijka ayaaad kala socon kartaan sharciyada goobaha gaadiidka la dhigto ee maalintaas. Waxaa kale oo aad kala socon kartaan khariidadda goobaha gaadiidka la dhigto Xaaladda Degdegga ah ee Barafka, sharciyada goobaha gaadiidka la dhigto adinka oo gelinaya cinwaanka goobta aad dooneysaan. Cadadkii ugu dambeeyey ee barnamika wuxuu uu bixiyyaa digniinta Xaaladda Degdegga ah ee Barafka.

#### **Waa maxay sharciyada u degsan barafka oo laga xaaqo waddo lugeedyada?**

Sharciga Minneapolis ee 445.20 wuxuu uu dhigayaa in mulkiilayaasha guryaha laga doonayo in ay barafka ka xaaqaan waddo lugeedyada hor mara guryahooda. Mulkiilayaasha guryaha iskood u taagan iyo kuwa is dulsaaran waa in ay 24 saac gudahood barafka kaga xaaqaan ka dib marka uu istaago. Dhamaan dhismayaasha kale waa in ay barafka ku xaaqaan 4 saacadood ee saacadaha maalinta (8 aroornimo ilaa 5ta galabnimo) ka dib marka uu barafku istaago.

#### **Maxaa dhacaya haddii aanan barafka ka xaaqin waddo lugeedyada?**

Haddii aadan wado lugeedka hor marta dhismaha aadan ka xaaqin barafka, waxaa laga yaabaa in laguu soo diro waraaq lagugu wargelinayo in aad xaaqdo. Hadii aadan weli barafka ka xaaqin marka kormeer lagu sameeyo, shaqaalahay aaya ka xaaqaya barafka waxaana laguu soo dirayaa biil. Haddii aadan bixin lacagta lagu soo weydiisto, waxaa lagu darayaa canshuurta dhismaha.

#### **Maxay muhim u tahay in la xaaqo waddo lugeedyada?**

Waddo lugeedyada magaalada waa in qof kasta ku socon karo sanadka oo dhan. Qaar badan oo ka mid ah dadka waayeelka ah wuxuu ay tagaan shaqooyinka, iskuulada, adeegga, balamadooda iyo meelo kale. Waddo lugeedyada aan laga xaaqin barafka waa kuwo aad khatar u ah oo adag tahay in lagu socdo. Waa mid si gaar ah ugu adag dadka naafada ah.

#### **Ka waran ka xaaqidda barafka geesaha?**

Iyada oo qeyb ka ah xaaqidda barafka ee waddo lugeedka, mulkiilayaasha dhismayaasha waa in ay xaaqaan geesaaha waddo lugeedyada iyo majaroorka wadada. Mulkiilayaasha lagama doonayo in ay xaaqaan barafka at soo riixaan gawaarida barafka xaaqa ee ka baxsan majaroorka. Shaqaalahay magaalada aaya xaaqaya kaas sida ugu dhaqsaha badan ee xiga xaaladda degdegga ah ee barafka.

Shaqaalaha magaalada ayaa xaaqaya qiyaastii 16,000 oo geesaha waddo lugeedyada, iyaga oo ka bilaabaya geesaha waadoonyinka Dadku Aad Ugu Lugeeyo. Khariidadda Waddo Lugeedyada Muhimadda Hore (PP) waxa aad ka arki kartaan halkan. Marka la dhameystiro xaaqitaanka PPC, haddii ay duruuftu ogolaato, shaqaaluhu waxa ay sii wadayaan nadiifinta geesaha kale iyada oo hadafku yahay in lagu dhameystiro hawshaas muddo 10 cisho ah.

**Goorma ayaa jardiinooyinka lagu lugeeyo iyo wadada bushkuleetiyada la xzaaqayaa?**

Wadooyinka lagu lugeeyo iyo kan bushkuleetiyada waxaa loo xaaqaa sida wadooyinka ay ku soo darsamaan. Maamulka Jardiinooyinka iyo Goobaha Lagu Madadaasho ee Minneapolis ayaa xaaqa jardiinooyinka Minneapolis. Mareeg (link) aad ku geli kartaan bartooda internetka, oo aad ka heli kartaan maclummaadka xaaqidda barafka ee jardiinooyinka, ayaad ka heli kartaan:

[https://www.minneapolisparks.org/park-care-improvements/maintenance/winter\\_maintenance/](https://www.minneapolisparks.org/park-care-improvements/maintenance/winter_maintenance/)

**Ka waran xaaqidda barafka ee haamaha qashinka iyo alaabada dib loo warshadeeyo?**

Si loo qaado haamaha qashinka, dadka magaalada deggan waa in ay xaaqaan dariiqa loo maro oo baneeyaan ilaa 3 dhudhun laga bilaabo waddo lugeedyada. Haddii aanay shaqaaluhu haanta qashinka u soo jiidi karin gaariga, waxaa laga yaabaa in aysan qashinka kaa qaadin. Waxaa intas dheer, in Sharciga Magaalada ee 225.680 uu dhigayo in magaaladu ku ganaaxdo \$30.00 halkii haan qashinba ee qashinka dib loo warshadeeyo haddii uu barafka yaalo oo uusan baraf di'in muddo 48 saacadood ah.

**Yaan la xiriirayaa haddii ay dhibaato ka jirto in la soo geli karo wadada guriga ama si wanaagsan loo xaaqin baabuur la dhigay darteed?**

Fadlan la soo xiriir 311 si aad u soo gaarsiiso waxyaabaha la xiriira xaaqidda barafka Fariinta waxaa loo gudbinayaa waaxda qaabilسان cinwaanka aad soo sheegtaan.